

Dhammeystirka School-Aged Basics (Aasaasiyaadka Da'da Dugsiga)

School-Age Basics (Aasaasiyaadka Da'da Dugsiga, SAB) waa 30-saac tababar ah oo buuxinaya qeyb ka mida shuruudaha badqabka iyo caafimaadka ee macalimiinta ka shaqeynaya xarumaha shaatiga haysta, WAC 110-301-0106 (3). Waxyaabaha uu ka kooban yahay wuxuu daboolayaa mawduucyada fadaraalku waajibiyey sida uu u baahan yahay Child Care Development Fund (Sanduuqa Horumarinta Daryeelka Caruurta, CCDF) iyo adeeg-bixiyaha daryeelka da'da dugsiga ee buuxiyey shuruuda SAB oo ku diwaangaliyey MERIT oo sidoo kale buuxiyey shuruudaha Nidaamyada Badqabka iyo Caafimaadka Shakhsiga.

Sideen u Dhammeystiri Karaa School-Age Basics (Aasaasiyaadka Da'da Dugsiga)?

Adeeg-bixiyayaasha da'da dugsiga waxay dooran karaan mid ka mida kuwan soo socda ee Gobolka Washington ee Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska, DCYF) ansixisay ikhtiyaarada lagu dhammeystiraayo shuruuda tababarka SAB:

- **COVID-19 Tababarka Kumeel-gaadhka ah ee CCB (Maaha Diyaar)**
Qeybtan ku meelgaarka, waxa loo tixgaliyaa in CCB aanay diyaar ahayn. Kuwa doortay ikhtiyaarkani, waxay u baahan doonaan inay dhammeystiraan qeyb dhammeystiran oo CCB inta lagu jiro sanad taariikheedka 2022 (Janaayo 1 – Diseembar 31, 2022).
- **Tababarka SAB**
Ku dhammeystir tababarkan onlaayn ama shakhsiyan, siduu bixiyey tababare uu ansixiyey gobolka DCYF. Ka raadi ikhtiyaarada la heli karo 'Hel Tababarka' onlaaynka MERIT ee <https://apps.dcyf.wa.gov/MERIT/Search>.
- **ECED&107 Caafimaadka, Badqabka & Nafaqada**
Dhammeystir kooraskan koolejka madaamoo DCYF-u aqoonsatay badelka SAB. Isticmaal Qeybta Qorsheynta Xirfada Barbaarinta onlaaynka <https://ececareers.del.wa.gov/find-degree/advanced-search> si aad u heshid haayadaha bixinaya kooraskan ee kugu dhow. Haddii aad dhammeystirtay kooraskan kahor jilaalka 2019, waa inaad dib u eegtaa daabacaadan *Hagaha Caafimaadka Caruurta iyo Kabka Badqabka* (EPS_0038) ee laga helaayo www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0038.pdf.





Sideen ayaan u hubiyaa in dhammeystirka Aasaasiyaadka Da'da Dugsigu ka muuqdo diwaankayga MERIT?

Fadlan u tixraac jaantuskan soo socda si aad u ogaatid cida ka masuulka ah ogeysiinta DCYF dhameystirka SAB.

Sideen u dhammeystiray Aasiyaadka Da'da Dugsiga?	Yaa hubinaya in MERIT muujinayso inaan dhammeystiray Aasaasiyaadka Da'da Dugsiga?	Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?
Tababarka SAB	Tababaraha gobolku ansixiyey ama DCYF wakiil-wakaalad ay aqoonsan tahay	Ma jirto talaabo loo baahan yahay. Haseyeeshee, haddii tababarkani aanu ku jirin diwaankaaga 30 maalmood gudohood oo aanad la xalin karin tababaraha, fadlan u sheeg arintan MERIT@dcyf.wa.gov oo sii nuqulka koobiga shahaadadada SAB.
ECED&107 Health, Safety & Nutrition (Caafimaadka, Badqabka, iyo Nafaqaynta)	Adeeg-bixiye/arday	Dhammeystir codsiga waxbarashada ee MERIT oo soogali ama iimayl kusoo dir nuqulka taransikibtiga rasmiga ah halkan education.verification@centralia.edu .



Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiiyo - Aasaasiyaadka Da'da Dugsiga

Maxaa ku jira Aasaasiyaadka Da'da Dugsiga?

Mawduucyada Caafimaadka iyo Badqabka (siday u baahan tahay CCDF)

- Ka hortaga iyo xakameynta xanuunada faafa (oo ay ku jiraan tallaaladu).
- Kahortaga dhimashada kadiska ah ee caruurta yaryar iyo isticmaalka qaabab seexasho oo badqaba.
- Maamulka daaweynta, oo waafaqsan heerarka ogolaanshaha waalidka.
- Ka hortaga iyo ka jawaabista xaaladaha degdega ee ay ugu wacan tahay falcelinta cuntada iyo xasaasiyadu.
- Badqabka guryaha iyo dhismayaasha, oo ay ku jiraan aqoonsiga iyo ka ilaalinta khataraha, meelaha biyo fadhiisiga leh, iyo cidhiidhiga baabuurta,
- U diyaargarowga xaalada degdega iyo qorsheynta jawaabta xaalada degdega.
- Latacaalida iyo kaydinta agabka halista ah iyo tuurista haboon ee qashinka deegaanka.
- Taxadirada haboon ee gadiidka caruurta, haddii ay khusayso.
- Gargaarka caruurta iyo daaweynta wadnaha.
- Aqoonsiga iyo kawarbiginta xadgudubka iyo dayacaada cunuga.

Shuruudaha tababarka CPR, Gargaarka Degdega, Xanuun-sababayaasha Dhiiga ku Dhasha iyo Badqabka Hurdada ayaan lagu darin SAB waana in la dhammeystiraa si loo buuxiyo WAC 301-0106.

Mawduucyada kale ee lagu daray SAB

Mawduucyadan soo socda ayaa lagu daray SAB oo kaa caawin kara buuxinta hadafka CCDF ee tababarka aasaasiga ah ee socda.

- Anshaxa iyo xirfada.
- Qadarinta canugkasta iyo qoyskasta.
- Koritaanka iyo horumarka caruurta.
- Isticmaalka indho-indheynta iyo qiimeynta wax lagaga qabanayo manhajka.
- Xeerarka horumarinta haboon.
- Qoyska iyo shuraakada bulshada.
- Caafimaadka iyo badqabka.
- Isdhexgalka iyo tilmaamta.
- Daryeel siinta dadka dhibataysan.

SAB waxa ku jira 30 saac oo casharo ah, laguna bixiyey 10 qeybood:

1. Korniiinka iyo horumarinta Canuga/Barbaarka.
2. Barashada Deegaanka iyo Manhajka.
3. Indho-indhaynta iyo Qiimeynta Canuga/Barbaarka.
4. Qoysaska, Bulshooyinka, iyo Dugsiyada.
5. Badqabka, Caafimaadka, iyo Nafaqada.
6. Lamacaamilka Caruurta/Dhallinyarada
7. Qorsheynta iyo Hormarinta Barnaamijka.
8. Horumarinta Xirfada iyo Hogaaminta.
9. Kartida Dhaqanka iyo Jawaabcelinta.
10. Horumarinta Dhallinyarada.

Ma heli karaa ka dhaafka SAB?

DCYF kama dhaafto adeeg-bixiyayaashu inay dhameystiraan tababarka loo baahan yahay ee caafimaadka iyo badqabka. Haseyeeshee, DCYF waxay dejisay nidaam kale oo lagu xusay sare si loo buuxiyo shuruuda SAB.

Kawaran haddii aan markahoreba ku haboonahay SAB?

Adeeg-bixiyayaasha buuxiyey shuruuda SAB ee qaab kasta oo hore loo bixiyey ka hor Juun 2021 oo ku diwaangaliyey diwaankooda MERIT loogam baahna inay dhammeystiraan Nidaamyada Caafimaadka iyo Badqabka Shakhsiga. Warbixinahan mawduucyada caafimaad iyo badqab fadaraal cusub ayaa lagu bixiyey hagaha dheeriga madaamoo macluumaad cusub lasii daayey. Ka akhri daabacaada *Hagaha Caafimaadka iyo Badqabka Dheeriga* (EPS_0038) oo laga helaayo onlaayn:

- Ingiriisi: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0038.pdf
- Isbaanish: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0038SP.pdf
- Soomaali: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0038SM.pdf

Haddii shahaadada tababarka aan la galin MERIT, DCYF ma aqbali doonto dhammaan shahaadooyinka dhameystirka tababarka todobo sano ka dib taariikhda tababarka.

Waxaad ka fiirin kartaa daabacaada *Shuruudaha Tababarka iyo Dhammeystirka Jadwalka Adeeg-bixiyayaasha Da'da Dugsiga* (EPS_0055) oo laga helaayo onlaayn www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0055.pdf wixii macluumaad dheeriya.

Ka waran haddii aan dhammeystiray ECED&107 Caafimaadka, Badqabka iyo Nafaqada laakiin diwaankayga MERIT aany muujineyn inaan buuxiyey shuruuda?

Haddii aanay wali waxbarashadaada lagu xaqiijin MERIT, fadlan dhammeystir codsiga waxbarasho oo soogali ama kusoo dir nuqulka iimaylka dhukumentiga rasmiga ah education.verification@centralia.edu.

Haddii marhoreba lagu xaqiijiyey waxbarashadaada MERIT, fadlan iimay u dir MERIT@dcyf.wa.gov oo sii nuqulka dhukumentiga aan rasmiga ahayn.

Miyaa SAB buuxinaysaa saacadaha tababarka sanadka?

Haddii aad dhammeystirtay tababarka SAB, waxaad buuxisay shuruuda tababarkaaga sanadka. Lagaagama baahna inaad dhameystirtid saacado adeeg dheeriya.

Haddii aad dhammeystirtay tababarkaaga SAB ama ikhtiyaarada kale ee u dhigma kahor sanadka hadda, maanad buuxin shuruuda tababarkaaga ee sanadka ee tababarkan. Waxaad u baahan tahay inaad dhameystirtid saacado adeeg dheeriya.

Xasuusin ahaan, saacadaha tababarka waxa dib loo eegaa jadwalka sanadka. Jadwalka sanadku wuxuu bilaabmaa bilowga Janaayo wuxuuna socdaa ilaa dhammaadka Diseembar.

Kawaran haddii aan ka wareego barnaamijka waxbarashada aasaasiga ah oo aan aado barnaamijka da'da dugsiga?

Wakhtigani, adeeg-bixiyaha da'da dugsiga ayaa dhammeystiray Aasaasiyaadka Daryeelka Caruurta marhoreba, shuruuda tababarkoodii koobaad ayaa loo tixgalin doonaa inay buuxiyeen. DCYF waxay diyaarinaysaa ikhtiyaar loogu talagalay kuwa ka guuraya barnaamijyada waxbarashada aasaasiga ah ee aadaya barnaamijka da'da dugsiga mustaqbalka.

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen, ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dhukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.

DCYF PUBLICATION EPS_0064 SM (11-2022) Somali